

# Animal Bites and Scratches

If you or your child is bitten or scratched by an animal, the wound can get infected. Clean the wound right away and **get medical help as soon as possible**. Even if the animal is your family pet, you should follow these steps:

1. Wash the wound well with soap and water.
2. Put pressure on the area to stop the bleeding.
3. When bleeding stops, put an antibiotic cream such as Neosporin on the wound.
4. Cover the bite or scratch with a clean bandage.
5. Get medical help the same day if possible.
  - ▶ Many bites are puncture wounds that can become infected if not cleaned well.
  - ▶ If any stitches are needed, they must be done within the first 12 hours after a bite.

Human bites should receive the same first aid and prompt medical attention as an animal bite.

Your child will be given a tetanus vaccine if he or she has not had one in the past 5 years. An adult needs the vaccine every 10 years.

Follow the treatment your doctor orders. Each day, until the wound heals, remove the bandage and check the wound. Clean the wound with soap and water and put on a clean bandage until the wound heals.

Your doctor will report the bite to your local health department. This should be done within 24 hours of the bite.

# Qaniinyada iyo Xagashada Xayawaanka

Haddii adiga ama ilmahaaga uu qaniino ama xagto xayawaan, waxa dhici karta in dhaawacu caabuqo. Isla markiiba nadiifi dhaawaca oo **sida ugu dhakhso badan u raadi gargaar caafimaad**. Xiitaa haddii xayawaanku yahay xayawaanka guriga qoysku ku rabaayadaysto, waa inaad raacdid talaabooyinkan soo socda:

1. Si fiican dhaawaca ugu dhaq saabuun iyo biyo.
2. Cadaadis saar aagga si loo joojiyo dhiigga.
3. Marka dhiiggu joogsado, dhaawaca mari burcad/bomaato ah antibiyootig sida Neosporin.
4. Meesha la qaniinay ama la xagtay ku dabool faashad nadiif ah.
5. Raadi gargaar caafimaad isla maalintaa haddii ay suurogal tahay.
  - ▶ Qaniinyo badan ayaa ah dhaawacyo dalool leh oo caabuqi kara haddii aan si fiican loo nadiifin.
  - ▶ Haddii loo baahdo wax ah tolmo, waa in lagu sameeyo gudaha 12-ka saacadood ee ugu horeeya ka dib qaniinyada.

Qaniinyada bini'aadanka waa in lagu sameeyo gargaar koobaad iyo daryeel caafimaad oo dhakhso ah oo la mid ah ka loo sameeyo qaniinyada xayawaanka.

Ilmahaaga waxa la siin doonaa talaal teetano haddii aan la siin mid 5-tii sannadood ee tagay. Qofka qaangaadhka ahi waxa uu tallaalka u baahan yahay 10kii sannadoodba mar.

Raac daweynta uu dhakhtarkaagu amro. Maalin kasta, ilaa dhaawacu ka bogsado, ka qaad faashadda oo eeg dhaawaca. Ku nadiifi dhaawaca saabuun iyo biyo oo saar faashad nadiif ah ilaa dhaawacu ka bogsanayo.

Dhakhtarkaagu waxa uu qaniinyada u sheegi doonaa waaxda caafimaadka ee degmada. Waa in tan lagu qabto gudaha 24 saacadood ka dib qaniinyada.

### **Call your doctor if:**

- The wound is red, swollen, warm to the touch, or more painful.
- There is more drainage or a bad odor from the wound.
- There is a fever over 101 degrees F or 38 degrees C by mouth.

### **What to do about the animal:**

- Call your doctor **right away** if you do not know the owner of the animal that bit you or your child. The animal may have rabies.
- If the animal was tame, try to find its owner. Find out if the animal has had shots for rabies, and the date the shots were done. The doctor will need to know this to plan treatment.
- When possible, put the animal in a fenced area away from people and other animals for 10 days. Watch for any changes in behavior. **Do not try to cage a vicious or wild animal.** Call the police or animal control department.
- If you or your child has been bitten by a bat or has slept in a room with one, **you must see a doctor.**

### **Safety Around Animals**

Teach your child to be safe around animals.

- Never bother an animal when it is eating.
- Do not pull on your pet's ears or tail.
- Pick up your pets slowly.
- Wash your hands after petting an animal.
- Do not feed wild animals or animals you do not know.

## **Wac dhakhtarkaaga haddii:**

- Dhaawacu leeyahay casaan, barar, diiran yahay marka la taabto, ama uu leeyahay xanuun.
- Dheecaan uu ka socdo dhaawaca ama uu leeyahay ur xun.
- Waxa jira qandho ka badan 101 F ama 38 darajo C oo afka laga cabiray.

## **Waxa laga yeelo xayawaanka:**

- Wac dhakhtarkaaga **isla markiiba** haddii aanad garanaynin qofka leh xayawaanka qaniinay ilmahaaga. Waxa dhici karta in xayawaanku qabo cudurka raybis/raabiyo (rabies).
- Haddii xayawaanku ahaa mid la dhaqday, isku day in la helo qofka leh. Soo ogow in xayawaanka laga talaalay raybis, iyo taariikhda talaalka la siiyay. Waxa uu dhakhtarku u baahan doonaa inuu tan oggaado si loo qorsheeyo daweyn.
- Markii ay suurogal tahay, xayawaanka geli xero dayr leh oo ka dhawrsan dadka iyo xayawaanka kale mudo ah 10 maalmood. U firso wixii ah isbeddelo ku dhaca dabeecadda xayawaanka. **Ha isku dayin inaad xeraysid xayawaan dagaalamaya ama xayawaan duurjoog ah.** Wac boliiska ama waaxda xakameynta xayawaanka.
- Haddii adiga ama ilmahaaga ay qaniintay fiidmeer/kibili ama ilmuhu seexday qol ay ku jirto fiidmeer/kibili, **waa inaad aragtid dhakhtar.**

## **Ammaanka Marka la ag joogo Xayawaanka**

Bar ilmahaaga inuu ammaan ahaado marka uu ag joogo xayawaanka.

- Marna ha qashqashin xayawaanka marka uu wax cunayo.
- Ha jiidin dhegaha ama saynta/dibka xayawaanka.
- Si tartiib ah sare ugu qaad xayawaanka.
- Dhaq gacmahaaga ka dib marka aad salaaxdid xayawaan.
- Ha quudin ama cunto ha siin xayawaanka duurjoogta ah ama xayawaanka aanad garanaynin.

Animal Bites and Scratches. Somali.

- Young children should not put their hands in an animal's tank or cage.
- Keep pets on a leash.

### **If a dog is threatening:**

- **Never scream and run.**
- **Stand very still** with hands at your sides. **Avoid eye contact** with the dog. When the dog loses interest in you, slowly back away until he is out of sight.
- If the dog does attack, place your jacket, book bag, or anything you can between you and the dog.
- If you fall or are knocked to the ground, curl into a ball with your hands over your ears and do not move. Try not to scream or roll around.
- **Always walk away** if a dog is growling or begins to growl when approached. **Never run!**

- Waa in caruurta yaryar aanay gacmaha galinin barkadda ama xerada xayawaanka.
- Xayawaanka ha loo galiyo qool ama xadhig.

### **Haddii uu ey kuu hanjabayo:**

- **Marna ha qaylin oo ha ordin.**
- **Istaag si dhaqaaq la'aan ah** adiga oo gacmaha ku haya dhinacyadaada. **Iska ilaali inaad eegtid indhaha** eyga. Marka eygu kaa daalo, si tartiib ah dib u dhaqaaq ilaa eygu kaa qarsoomayo.
- Haddii eygu ku soo weeraro, jaakitkaaga, boorsada buugaagta, ama wax kale oo kasta, ha idiin dhexeeyo adiga iyo eyga.
- Haddii aad dhacdid ama uu dhulka kugu tuuro, isku duub sida kubad/banooni oo kale iyada oo gacmahaagu saaran yihiin dhegahaaga hana dhaqaaqin. Isku day in aadan qaylinin ama aadan is rogrogin.
- Markasta **socod kaga fogow** haddii eygu uu gurxamayo ama uu bilaabo inuu gurxamo marka loo soo dhawaado. **Marna ha cararin!**

2008 – 6/2012 Health Information Translations

Unless otherwise stated, user may print or download information from [www.healthinfotranslations.org](http://www.healthinfotranslations.org) for personal, non-commercial use only. The medical information found on this website should not be used in place of a consultation with your doctor or other health care provider. You should always seek the advice of your doctor or other qualified health care provider before you start or stop any treatment or with any questions you may have about a medical condition. The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health System, OhioHealth and Nationwide Children's Hospital are not responsible for injuries or damages you may incur as a result of your stopping medical treatment or your failure to obtain medical treatment.

Animal Bites and Scratches. Somali.